


Adeegyada Carruurta ee Victoria

Macluumaadka waalidiinta
iyo weliyaasha

Ilmo kasta
ha helo
fursad
kasta



Waxaa daabacay Qaybta Horumarinta Adeegga

Wasaaradda Waxbarashada iyo
Tarbiyada Carruurnimada Hore

Melbourne

Maariso 2010

© State of Victoria State of Victoria
(Wasaaradda Waxbarashada iyo
Tarbiyada Carruurnimada Hore) 2010

Xuquuqda daabacaadda ee dokumantigan waxaa iska leh Dowladda Victoria (Wasaaradda Waxbarashada iyo Tarbiyada Carruurnimada Hore), ama kaysaska waxyaalaha qaarkood, waxaa iska leh qaybo saddexaad (waxyaalaha qaybta saddexaad). Qayb ka mid ah lama daabacan karo marka laga reebo raacidda xeerarka Sharciga Xuquuqda Daabacaadda 1968, the National Education Access Licence for Schools (NEALS), (ka eeg hoos) ama ogolaansho.



Haya'daha waxbarashada oo ku yaal Australia kuwaas oo aan faai'do ka raadsanayn, ama qof ka masuula maamulidda haya'ddaas, wuu daabacan karaa wuuna tabin karaa macluumaadka, aan ka ahayn macluumaadka qaybta saddexaad, ayadoo looga jeedo ujeeddooyin waxbarasho ee haya'ddaas.

Waxaa ogolaatay Wasaaradda Waxbarashada iyo Tarbiyada Carruurnimada Hore,

2 Treasury Place, East Melbourne, Victoria, 3002.

Dokumantigan waxaa kaloo laga heli karaa
www.education.vic.gov.au/licensedchildservices

Qaanuunka adeegyada carruurta – sida nidaamku u shaqeeyo

**Maadaama aad tahay
waalid ama weli waxaad
doonaysaa inaad hubiso in
ilmahaagu mar kasta ku jiro
gacmo habboon.**

Sida qoysasku u badan yihiin, waxaa jiri kara waqtiyo iyo duruufo badan oo kala duwan kuwaas oo aad u baahan tahay in ilmahaaga uu daryeelo qof kale, ama si joogto ah ama hadba marmar.

Victoria waxay leedahay shuruuc iyo qawaaniin kuwaas oo qeexa sida daryeelkaas loo bixiyo xaaladahaas faraha badan.

Carruurta waa kuwo baylah ah, ayadoon ku xidhnayn halkay joogaan ama cidda ay la joogaan, ka waalid ahaan waxaad doonaysaa inay ammaan yihiin. Carruurta waxay kaloo yihiin kuwa mar kasta wax baranaya, ayadoon ku xidhnayn halkay joogaan ama cidda ay la joogaan, waalidiintuna waxay doonayaan in waayo-aragnimadan waxbarasho inay noqoto mid habboon oo caafimaad qabta. Dowladda Victoria markaas waxay sharciyeysaa daryeelka carruurta oo ah noocyo rasmi ah ee siyaabaha daryeelka si loo hubiyo inay ka ilaalsan yihiin waxyeello iyo in fursadhooda horumarineed meesha ugu saraysa laga gaarsiiyey.

Buug-yarahan wuxuu kuu sharxayaa noocyada xaaladaha halka daryeelka ilmahaaga uu ogolaaday ama sharciyeeyay Sharciga Adeegyada Carruurta 1996 (Children's Services Act 1996) (Sharciga) iyo Qawaaniinta Adeegyada Carruurta 2009 (Children's Services Regulations) (Qawaaniinta).

Waxa kaloo ku siinayaa macluumaadka ku saabsan wejiyada daryeelka ee kala duwan kuwaas oo ku salaysan qaanuunka. Halkii ilmahaaga uu daryeelo adeegga carruurta la sharciyeeyey waxaad xaq u leedahay inaad ogaato waxa qaanuunku ka filayo adeeggaas.

Waxaa kaloo muhiim ah inaad ogaato halka la tago si cabasho loo sameeyo haddaad u malaynayso inaan adeeggu qabanayn waajibaadkeeda. Buug-yarahan wuxuu bixinayaa faahfaahinta xiriirka la hayo (ka eeg bogga 7aad).



Qaanuunka Adeegyada Carruurta



Sharcigu waa xeerka Victoria kaas oo qoraya nidaamka ruqsada iyo qaanuunka ee adeegyada daryeela ama waxbara carruurta. Wuxuu qorayaa markii adeegga loo baahan yahay si loo helo ruqsad wuxuuna saarayaa waajibaadyo ballaaran adeegga, ay ku jiraan waajibka in lagu dhaqmo Qawaaniinta. Qawaaniinta waa xeerar faahfaahsan, oo guud kuwaas oo taageeraya Sharciga isla markaasna qoraya asaaska ugu hooseeya kaas oo ay tahay in adeegyada carruurta ee ruqsadda leh inay qabtaan.

Cid kasta oo ku lug leh maamulka adeegga carruurta ee Victoria waajibaad baa ka saaran xagga Sharciga iyo Qawaaniinta – ruqsad-haystaha, maareeyaha, shaqaalaha, folanteeriga, daryeelayaasha maalinta ee qoyska. Ka waalid ahaan ama weli ahaan, waxaad xaq u leedahay inaad rajayso in qof kasta oo jooga adeegga uu ilmahaagu tago inuu si taxadar leh uga soo baxo waajibaadkiisa.

La-taliyeyaasha adeegyada carruurta oo u shaqeeya Wasaaradda Waxbarashada iyo Tarbiyada Carruumimada Hore (Wasaaradda) waxay si joogto ah ula socdaan adeegyada carruurta ee ruqsadaysan si loo hubiyo inay ku dhaqmayaan Sharciga iyo Qawaaniinta. Sharciga iyo Qawaaniinta waa khasab tallaabo ayaana laga qaadayaa adeegga haddii uusan ku dhaqmayn.

Tallaabooyinkan waxay noqon karaan kuwo u dhaxeeya amar-siin ilaa kuwo wax ka baddelid ah qaybaha adeegga ilaa tallaabooyin adag, sida xiridda adeegga ama maxkamadaynta qofka ruqsada haysta ama shaqsiyaad kale.

Sharciga, erayga adeegga carruurta waxaa loo adeegsadaa oo keliya inuu wax ka sheego xaaladaha ama hababka daryeelka kuwaas oo looga baahan yahay sharciga si loo helo ruqsad. Habka dayeelka oo kastaa kaas oo ka baxsan qeexitaankan looma arko adeeg carruureed marka la raacayo Sharciga umana baahna ruqsadda adeegga carruurta.

Haddii qof uu daryeelayo ilmahaaga xaalad ku habboon qeexidda Sharciga adeegga carruurta, markaas waa inay helaan ruqsad (taas oo ku xiran waxyaalo laga reebay qaarkood). In lagu shaqeeyo ama xataa la iclaamiyo adeegga carruurta aan ruqsadda lahayn, markii Sharciga u baahan yahay in adeegga ruqsad la siiyo, waa dambi daran. Waxaa kaloo muhiim ah inaad leedahay faham macquul ah noocyada adeegyada ay tahay in ruqsad la siiyo ama lagu sharciyeeyo qanuunkan.

Haddii ilmahaagu uu tagayo adeeg kaas oo looga baahan yahay inuu ruqsad helo:

- waxaad xaq u leedahay inaad eegto ruqsadda adeegga mar kasta
- Ruqsaddu waa in lagu dhejiyaa iridka laga soo-galo adeegga.

Macluumaadka kale oo la muujinayo waxaa ka mid ah:

- magacyada dadka ka masuulka ah adeegga
- ujrrooyinka la qaado
- dulmarka barnaamijyada carruurta la siiyo
- faahfaahinta habraaca ka-baxsiga degdegga ah
- cidda lagala xiriirayo cabashooyinka.

Macluumaadka ku saabsan adeegyada carruurta halkaas oo tallaabo sharci ah laga qaaday sababo ku dhaqmid la'aan qaanuunka, adeegyada carruurta waxaa lagu daabacaa website-ka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tarbiyada Carruumimada Hore oo ah www.education.vic.gov.au/licensedchildservices

Adeegyadee looga baahan yahay inay helaan ruqsad?

Guud ahaan, waa ujeeddada sharciga inuu keliya sharciyeeyo noocyada rasmiga ah ee nidaamyada daryeelka.

Maadaama ay jiraan nidaamyada kala duwan kuwaas oo carruurta ay daryeelaan dad aan ahayn waalidkooda ama weliyadooda, sharciga qeexaya adeegga carruurta (taas oo ah, adeeg ay tahay inuu helo ruqsad si uu u shaqeeyo) wuxuu leeyahay dhowr qaybood iyo qaybo laga soo reebay.

Guud ahaan, waa ujeeddada sharciga inuu keliya sharciyeeyo noocyada rasmiga ah ee nidaamyada daryeelka. Waalidiinta iyo weliyada badanaa waxay sameeyaan nidaamyada ay cid kale u geystaan si uu u daryeelo carruurtooda. Noocyadan ah niddamyada daryeel ee aan rasmiga ahayn guud ahaan uma baahna in la ruqsadeeyo. Sida nidaamyada rasmiga ah oo kale.

Waxyaalaha qaarkood kuwaas oo muhiim u ah ogaanshaha in adeeggu u baahan yahay ruqsad iyo in kale waxaa ka mid ah:

- inta carruur oo lagu daryeelo
- intay jiraan da' ahaan carruurto
- bal in adeeggu uu ka helayo wax lacag ah ama abaalmarin ah daryeelka carruurta
- bal inaad adigu joogto marka uu adeeggu daryelayo ilmahaaga.

Buug-yarahan wuxuu eegayaa qaar ka mid ah noocyada nidaamyada daryeelka kuwaas oo aad u adeegsato ilmahaaga, wuxuuna sharxayaa sida mid kasta oo qodobadan ka mid ah ugu habboon yahay mid kasta oo xaaladahaas ka mid ah.



Daryeelka xarunta-ku-xiran

Daryeelka xarunta-ku-xiran waa marka daryeelka lagu bixiyo meel kale oo aan ahayn guriga.



Haddii ilamhaaga lagu daryeelo meel ka baxsan guriga – ha ahaato mid joogto ah ama mid marmar ah – markaas, badanaa xaaladaha badidooda, adeegaas waxaa looga baahan yahay inuu ruqsad qaato. Taasna badanaa waxaa loo yaqaan Daryeelka xarunta-ku-xiran.

Sharcigu wuxuu leeyahay in nidaamyadaas ay tahay in la ruqsadeeyo haddii adeeggii bixinayo daryeel ama waxbarasho ilaa afar ama ka badan oo carruur ah kana yar da'da 13 sano ayagoo uu ka maqan yahay waalidkooda ama weliyadooda, iyo:

- adeeggu wuxuu helayaa ugrad ama abaalmarin (taas oo ay ku jiraan abaalmarinta aan lacagta ahayn) bixinta daryeelka ama waxbarasho; ama
- waalidiinta ama weliyeyasha carruurta waxay adeegsadaan adeegyada ama tas-hiilaadka adeegga ka jira marka carruurtooda lagu daryelayo, tusaale, xaruumaha cayaarta ama kuwa lagu nasto kuwaas oo macaamiishooda siiya daryeel ilmo oo lacag la'aan ah.

Xeerarkan waxay ka shaqeeyaan Victoria oo dhan, ayadoon hadba sida ilmahaagu u tago adeegga carruurta. Tusaaleyaaalka qaarkood ee adeegyada carruurta oo xaruunta ku salaysan waxaa ka mid ah:

- adeegyada daryeelka maalinta oo dhan
- kindhooyinka
- adeegyada daryeelka marlaha ah, oo ay ku jiraan guryaha deriska
- adeegyada daryeelka saacadaha dugsiga ka baxsan
- adeegyada daryeelka ilmaha oo lagu bixiyo xarunta cayaaraha iyo kuwa nasashada
- adeegyada haynta-ilmaha oo laga bixiyo fadhigada ama bandhigada beeraha
- adeegyada haynta-ilmaha oo laga bixiyo meelaha dalxiiska ah

Ka-reebis

Waxaa jira waxyaalo laga soo reebay adeegyada looga baahan yahay ruqsadda. Kuwaasna waxaa ka mid ah playgroup-ka, kooxaha amarka keliya, iyo dugsiyada.

Playgroup-ka qaarkood

Playgroup-ka ka diiwaan-gashan Playgroup Victoria Inc. uma baahna in ruqsad la siiyo. Playgroup Victoria Inc. Waxay leedahay dhowr tilmaamood kuwaas oo xubnahoodu ay ku qasban yihiin inay raacaan, kuwaas oo ay ka mid yihiin in mar kasta ugu yaraan ay joogaan hal waalid, weli ama daryeelo afartii carruur ah ee kooxda ka tirsan.

Haddii playgroup-ku aysan ka diiwaan gashanayn Playgroup Victoria Inc., markaas waxay u baahan doontaa inay ogaato haddii nidaamku uu yeelanayo shuruudda 'adeegga carruurta' iyo, haddii looga baahan doono ruqsad. Playgroup-ka halkaas oo waalidiinta carruurta oo dhan ay la joogaan carruurta uma baahna inay ruqsad hesho.

Kooxaha amarka keliya la siiyo

Kooxda carruurta halkaas ay qaadayaan amar hal nashaad ah ama cayaar ah, looma baahna adeeggaas inuu ruqsad helo. Taasna waxaa ku jiri kara waxyaalaha sida tababarka cayaarta dugsiga ka-dib, casharada muusikada, baaleedka ama dugsiyada Axadda.

Dugsiyada

Markii uu dugsiyada uu bixinayo waxbarasho ayadoo la raacayo shuruudda Sharciga Dib u habeynta Tababarka iyo Waxbarashada 2006 (Education and Training Reform Act 2006) uma baahna inuu helo ruqsadda adeegyada carruurta. Haddaba taasi waxay ku dabaqmaysaa waxbarashada lagu bixiyo dugsiyada diiwaangashan inta lagu jiro maalinta dugsiga ee caadiga ah ee carruurta dhigata Bareebka ama wixii ka sarreeya. Si kastaba ha ahaatee, markii uu dugsiyada bixinayo daryeelka saacadaha dugsiga ka baxsan (ka-hor iyo ka-dib dugsiga ama daryeelka fasaxa), markaas ruqsadda daryeelka carruurta ayaa loo baahan yahay.

Daryeelka Maalinta ee Qoyska

Daryeelka Maalinta ee qoyska waa halka daryeelka ilmaha lagu bixiyo guriga daryeelaha taas oo hoos imanaysa nidaamka rasmiga ah.

Daryeelka maalinta ee qoyska waa halka daryeelka ilmaha lagu bixiyo guriga daryeelaha ayadoo la raacayo nidaamka rasmiga ah. Xaaladahaas oo kale, adeegga daryeelahaagu ka diiwaangashan yahay waxaa looga baahan doonaa inay lahaato ruqsad. Sharciyada qaarkood ee khuseeya barnaamijka/adeegyada daryeelka maalinta ee qoyska waxaa ka mid ah:

- daryeelayaashu waa inaysan daryeelin wax ka badan toddoba carruur ah isla mar keliya (oo ay ku jiraan carruurta daryeelaha)
- daryeelayaashu waa inaysan daryeelin wax ka badan afar carruur ah oo ka yar da'da lix sano isla mar keliya (marka laga reebo haddii carruurta lixda sano ka yar ay dhammaantood walaalo yihiin, markaas oo waxaan ka badnayn lix walaalo ah oo ka yar da'da lix sano lagu daryeelayo ama wax lagu barayo mar keliya; ama carruurta yihiin arday kuwaas oo ku qoran dugsiga).
- waa in daryeeluhu ka diiwaangashan yahay barnaamijka/adeegyada daryeelka maalinta ee qoyska kaas oo ruqsad ka haysta qaanuunka la raacayo.

Mararka qaarkood barnaamijka/adeegyada daryeelka maalinta ee qoyska waxay ku qabtaan adeegyada qaarkood goobaha aan ahayn guriga daryeelaha. Taasna waxaa loo yaqaan 'daryeelka goobta'. Daryeelka goobta waxaa keliya oo qaban kara barnaamijka ama adeegga daryeelka maalinta ee qoyska oo ruqsadda leh, iyo keliya markii ay Wasaaraddu ogolaato goobta.

Haddii aan daryeeluhu ku dhaqmayn shuruudahaas, waxay ku shaqaynayaan adeegga carruurta aan ruqsadda lahayn, taas oo ah dambi daran marka la raacayo Sharciga.

Ka-reebis

Haddii ilmahaaga uu guriga ku daryeelayo qof kale taas oo ah nidaamka aan rasmiga ahayn markaas looma baahna ruqsad, tusaale, markii derisyadu toogaystaan daryeelka midba carruurta kan kale markii ay carruurta ka soo laabtaan dugsiga.

Xannaanaysada waxay bixisaa daryeelka ilmaha ee gurigooda.

Xannaaneyso

Haddii aad qabsato daryeele, sida xannaanaysada, si ay kuugu ilaaliso ilmahaaga gurigaaga, looma baahna wax ruqsad ah.

Xannaanaysada waxay kaloo ilaalin kartaa carruur kale oo dheeraad ah, oo aan ka ahayn ilmaha gurigooda la joogo, maaddaama aysan jirin wax ka badan afar carruur ah oo ka yar da'da dugsiga waqtigaas la joogo. Haddii ay jiraan wax ka badan afar carruur ah oo ka yar da'da dugsiga oo ku jira daryeelka xannaaneysada isla hal waqti, markaas daryeelkaas wuxuu yeelanayaa shuruudii 'adeegga carruurta' haddii ay sidaas noqotana waxaa loo baahan karaa ruqsad.



Maxay qorayaan Sharciga iyo Qawaaniintu?

Sharciga iyo qawaaniinta waxay qorayaan waxyaalo badan oo khuseeya sida adeegyada carruurta ugu shaqeeyaan carruurta.

Sharciga iyo Qawaaniintu waxay qorayaan waxyaalo badan oo khuseeya sida uu u shaqeeyo adeegga carruurta ee ku aadan carruurta.

Sharcigu wuxuu uga baahan yahay adeegga carruurta ruqsada haysta inuu:

- ka ilaaliyo ilmahaaga wixii waxyeelo iyo khataro ah
- siiyo ilmahaaga barnaamij waxbarasho ama mid madadaalo
- hubiyo in ilmahaaga sabab aan macquul ahayn loo anshaxo
- siiyo kormeer ku filan ilmahaaga
- hubiyo ku-filaanshaha iyo dayactirka degaanka
- la socdo anaphylaxis-ka
- kaafiyo nisbadda u dhaxaysa ilmaha/shaqaalaha
- la socdo shilalka dardaran
- markii la ogolaado, in la siiyo daawada ilmahaaga.

Qawaaniintu waxay qoraysaa faahfaahinta qiyaasta ugu hoosaysa taas oo adeegyada oo dhan ay tahay inay ku dhaqmaan. Waxay qorayaan shuruudaha ah:

- intay le'eg yihiin shaqaalaha adeegga heeganka ku ah si ay u daryeelaan ama wax u baraan carruurta ayadoo la raacayo tirada iyo da'ha carruurta joogta
- tababarka iyo shahaadooyinka shaqaaluhu yeelanayo
- nidaamyada jiri doona oo wax looga qabanayo wixii degdeg ah
- nidaamyada jiri doona oo ku saabsan cidda ilmahaaga ka wadaysa adeegga
- nidaamyada jiri doona oo ku saabsan dalxiisyada gaaban iyo maja-baxsiga
- Gargaarka Degdegga iyo Daaweynta
- la socdo anaphylaxis-ka
- diiwaannada ay tahay in lagu hayo adeegga
- macluumaadka adeeggu ay tahay inuu siiyo waalidiinta iyo daryeelayaasha
- siinta cuntada ee ilmahaaga
- boosaska cayaarta gudaha iyo tan dibadda.



Halkee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Haddii aad doonaysid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada carruumimada hore ee ka jira Victoria, waxaad aqrisaa Ku-soo-dhawow Adeegyada Carruumimada Hore – Buug-yaraha Tilmaamaha Waalidiinta ee Adeegyada Carruumimada Hore ee Victoria 2010 (macluumaad gaar ah ee daryeelka oo ka bilaabma bogga 19aad). Waxaad koobi ka soo degsan kartaa website-ka Wasaaradda ee ah www.education.vic.gov.au/about/publications/newsinfo/welcomeecservices.htm

Haddii aad doonaysid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa uu Sharcigu iyo Qaanuunadu u baahan yihiin:

- weydii adeegga ilmahaaga si uu kuu siiyo helidda koobigooda ee Sharciga iyo Qaanuunada
- ka hel koobigaaga ee Sharciga iyo Qaanuunada Information Victoria adoo sii maraya www.bookshop.vic.gov.au

- ka eeg daabacaadaha iyo xogaha ay soo saartay Wasaaraddu www.education.vic.gov.au/licensedchildservices
- kula xiriir Khadka Waydiinta Adeegyada Ruqsadaysan ee Wasaaradda taleefanka 1300 307 415 ama adoo email u dra licensed.childrens.services@edumail.vic.gov.au
- la hadal la-taliyaha adeegyada carruurta oo laga helo xafiiska gobolka ee kuugu dhow ee Wasaaradda. Xiriirada waxaa laga heli karaa www.education.vic.gov.au/about/structure



Markii aadan hubin in adeeg gaar ah uu ruqsad helayo

Sharciga ku saabsan ruqsad-siinta adeegyada carruurta mararka qaarkood waa mid wareer ah mar kastana isla markiiba ma cadda bal in nidaamka qaarkiis soo-galayo qeexitaanka Sharciga adeegga carruurta iyo in kale.

Haddii aadan hubin in adeeg gaar ah bal inuu helo ruqsad iyo in kale waa inaad wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriirtaa la-taliyaha adeegyada carruurta oo laga helo xafiiska gobolka ee kuugu dhow ee Wasaaradda. Si aad u hesho macluumaad dheeraada ka eeg: www.education.vic.gov.au/licensedchildservices

Wixii macluumaad dheeraad ah oo la xiriira daryeelka aan sharciyeysnayn, ka eeg website-ka Xafiiska Guddoonka Ammaanka Carruurta oo laga helo: www.ocsc.vic.gov.au

Wixii macluumaad ah oo la xiriira playgroups-ka, ka eeg website-ka Playgroup Victoria Inc. oo laga helo www.playgroup.org.au





